MAXAAD KA TAQAANAA JABHADII AFRAAD IYO AASAASKII SNM?

Codsiyo aad u badan oo i soo gaadhay dartood ayaan mar labaad taariikhdan kooban ee jabhadii Afraad, oo waxoogaa madmadaw ahi meelaha qaarkood dadka ka galay

Maxaad ka taqaanaa jabhadii Afraad iyo cidii, sidii, halkii iyo goortii la aasaasay? - Codsiyo aad u badan oo i soo gaadhay dartood ayaan mar labaad taariikhdan kooban ee jabhadii Afraad, oo waxoogaa madmadaw ahi meelaha qaarkood dadka ka galay, u soo qoray si aan u iftiimiyo meelahaa. Xogo ka dhinaa maqaalkii horena iyo ilduufyo ku jirayna waan sugay aniga oo soo waraystay wax garadkii iyo dadkii xogta hayay siiba labadii nin ee iyagu bilaabay ururinta dhalinyarada degaanka, oo ah ragii sameeyay Afraad oo la kala yidhaa magacyadooda, Maxamed Aadan Cigaal(wadaad-yare) iyo Cali Cabdi Xasan(cali-kayd).

Qoraalkani waa taariikhdii Afraad oo kooban, iyo weliba waayahii ku gadaanaa guud ahaan degaamada Somaliland, gaar ahaana degaanka Gabiley intii u dhaxaysay 1976-1982 ee keenay ama sababay inay Afraad dhalato., hadii aan dib ugu yara noqdo maqaalkii u horeeyay ee Afraad, oo si aad ah u faafaay, waxa ku jiray qaladaad badanoo xaga higaada af-soomaaliga ah iyo weliba erayo dadka qaar ay dhibsan karaan, waan ka raali galinayaa taa akhristayaasha, ugumaan talo galin inuu sidaa ku faafo, laakiinse qalad dhacay buu ahaa in qoraalka oon la tafaqyo tirin la soo daabaco.
Hordhac. -

1976-kii waxa ay dawladii milatariga ahayd ee dalkii somaliya la isku odhan jiray ka arimin jirtay ay bilowday in ay abaabul dagaal gasho, oo ay dad shacaba oo qaarkood laga soo qaadi jiray Itoobiya tababar milatri siiso, tababarka ka dibna inta lagu badhxo askar kale oo milatari ah oo dharcad ah, dib ugu celin jirtay gudaha Itoobiya oo ay halkaa ka jabhadayn jireen oo ay dagaalo goosgoosa ku qaadi jireen xarumaha ay degan yihiin Itoobiyaanku, ama ay jidadkaba u gali jireen gawaadhida Itoobiyaanka oo ku gubi jireen, waxa jabhadaa lagu magacaabi jiray jabhada xoraynta soomaali galbeed (j x s g).

Dhulka xadka ah ee Somaliland waa laga dareemi jiray, dhaqdhaqaaqaa ay dawladii Somaliya waday, oo dhaawaca Jabhada (j x s g) oo Itoobiya mararka qaarkood ku soo dhawaacmay la keenyaa, dad jabhadnimo loo tababarayo ama loo soo tababaray oo

Copyright ©2003- Mareegta Raadraac ee Farshaxan. All Rights Reserved.

itoobiya lagu wado la soo mariyaa, saamayn wayn bay ku lahayd nolol maalmeedka dadka ku nool magaalooyinka xadka Somaliland ku yaala oo lagu habeen dhixin jiray.

1977-1978-kii waxa dawladii milatariga ahayd ee dalkii Somaliya la isku odhan jiray maamulaysay ay dagaal wayn la gashay dalka Itoobiya, waxa dagaalkaa ka qayb galay dadka Soomaaliyeed oo dhan, ha u badsadaan dadka reer Somaliland oo si jibaysan oon kala hadh lahayn ugu huray dagaalkaa bilow ilaa dhamaad naf iyo maalba, waxa dagaalku markii uu ka bilaabmay Itoobiyaba, iyaguna soo qaxay dadkii soomaaliyeed ee Itoobiya ku noolaa oo qaxootinimo ku soo galay Soomaaliya, in badan oo ka mid ahna la soo dajiyay Somaliland, kuwaasoo dadka somaliland ku nooli ay qalbi iyo gacmo furan ku soo dhaweeyeen. Intii dagaalkaasi socday khasaare aan la koobi karin oo dad iyo duunyoba leh ayaa uu ku keenay dadkii soomaaliyeed meel ay joogaanba, waxa dawladii Itoobiya ay laysay dad badan oo shacaba oo Itoobiya ku noolaa, waxa kale oo ay diyaarado ku dukhaysay magaalooyin badan oo ku yaalay dalkii la isku odhan jiraya Somaliya, ha ugu bataan magaalooyinka ku yaal Somaliland-e.Dagaalkii lala galay Itoobiya laguma guulaysan waana lagaga adkaaday dawladii dalkii Somaliya ka arimin jirtay, ciidamadii iyo jabhadii(j x s g) galay dagaalka oo aad u tiro badan ayaa 1978-kii si habqan ah oo cago jiid ah dib ugu soo laabtay dalkii Somaliya. Markii ciidamadii soomaaliyeed iyo jabhadii la socotay lagu soo jabiyay dagaalka, ee ay ku soo laabteen Somaliya waxa daafac laga galay meelaha xadka ah, oo waxa laga cabsi qabay inay Itoobiya soo gasho gudaha dalkii la isku odhan jiray Somaliya, meelahaa la dejiyay jabhada iyo ciidamada waxa ka mid ahaa magaalooyinka xadka ku teedsan ee Somaliland, waxase ay tirooyinka ugu badan ee jabhada iyo ciidamdu joogeen oo ay iskugu yimaadeen iyaga oo dhaqaale ahaan ku soo raacaya degaaanka degmada Gabiiley(allaybaday, geed-balaadh,wajaale,kalabaydh iwm) oo hodan ku ahaa kala iibsiga alaabta iyo xoolaha nool, beeraha iyo jaadka oo isna soo mari jiray.

Dagaalkii sidii looga soo jabiyay dawladii milatariga ahayd ee dalkii la odhan jiray somaliya-ba, waxa dalkii uu galay jaho wareer bulsho, siyaasadeed, dhaqaale , taasi waxa ay keentay inuu lumo kala danbayntii iyo ilaalintii sharcigu, iyaga oo taa ka faaiidaysanaya hadaba ayaa jabhadii iyo askartii la soo dejiyay ama iskoodaba u soo foof tagay ay degaanka deg, Gabiiley ka bilaabeen inay dil, dhac, boob, kufsi iwm,dadkii degaanka iyo cidii degaanka dhexmartaba u gaystaan, dadka shacabka ahi kama waxtar la" ayn oo waxa loo ururin jiray xoolo ay quutaan jabhada iyo askartu, jaadka waxa laga siin jiray lacag iyo jaad ay cunaanba oo aan dawladu u qorshayn ee dadku u gartay ama ay jabhada iyo askarta laftarkeeduba qoondaysteen, taasi se ma ay noqon mid dadka degaanka looga mahad celiyay ama kuba badbaadaan.

Dilkii, dhacii iyo xumaantii kaleba waxay noqotay mid maalinba maalinta ka danbaysa sii badata oo gaadhay heer qofnaba uu ka badbaadi waayo, cida dhibta ugu badan gaysanaysay waxay ahayd Jabhadii xoraynta somali galbeed la odhan jiray, ee shalay markii Itoobiya lala dagaalamayay dadkan hada ay xumaynayaan ka helayay wax kasta,

Copyright ©2003- Mareegta Raadraac ee Farshaxan. All Rights Reserved.

dadkani waa dadkii hiil iyo hooba la garab joogay ee naftooda iyo maalmoodkaba u hurayay, waa dadka hadadan la joogo qaadhaanka u guraya ee quudinaya, ee ku sooryaya niyad samida, ee xididka iyo gacalkaba la ah, ma ay xeerin jirin jabhadu haba yaraatee waxaasoo dhan ee qawlaysiga iyo hagardaamadaynta dadka waa ay iska wateen. Dadka degaankuse iyaga oo walaaltinimadi, soomaalinimo iyo qiiradii wadaninimo oo xiligaa aad u kacsanayd ku jirto ayay si kasta oo ay wanaag bidayeenba iskugu dayeen inay dhibtan ku joojiyaan, ergo,dacwad iyo wax kastaba way ku bilkaydiyeen xalinteeda ha yeeshee midna wax midho ah ma dhalin, waxa ay gabagabadii arintii iskugu soo ururtay in aan male kale jirin ee ay arintu tahay ragoow rag iska dhaw!!! Dadkii degaanku waxa uu ku khasbanaaday inay dagaal gudoonsadaan, go" aan hoose waxay ku gaadheen inay dhalinyaradii degaanka ururiyaan oo ay sharaftoda, naftooda iyo maalkoodaba difaacdaan, halkaa waxa ka bilaabmay is abaabul iyo is ursi lagaga baaraan degayo sidii loo samayn lahaa jabhad degaanka iyo dadkaba gaashaan u noqota, oo ka caabida dhibkii ay ku hayeen jabhadii xoraynta somali galbeed iyo askartii xadka degaanka deg, Gabiiley deganayd, halkaasaa ay ka bilaabantay xerayntii dhalinyaradii u horaysay ee unugday jabhadii Afraad, taariikhdu markay ahayd 24/08/1978 oo lagu xereeyay xero laga sameeyay kayn(cayn) ku taal halka xadka Itoobiya iyo Somaliland u dhaxeeyaa uu maro oo la yidhaahdo harta Cabdilahi-faruur. Afraad: Marxaladahii iyo magacyadii ay soo martay. - 24/08/1978, laba nin oo ka mid ah odayaasha Geed-baalaadh oo magacayadooda la kala yidhaa, Maxamed Aadan Cigaal (wadaad-yare) iyo Cali Cabdi Xasan (cali kayd) oo ahaa ragii u guntaday samaynta jabhad degaanku leeyahay, ayaa ku soo xereeyay 25-kii nin ee ugu horeeyay ee lagu bilaabay jabhadii Afraad xero looga sameeyay Harta Cabdilahi faruur oo 4-5 kilo mitir bari ka xigta magaalad geed balaadh, kuna taala xadka u dhaxeeya Itoobiya iyo Somaliland, si ay u yeeshaan sumad gaar ahna waxa loo bixiyay magac la yidhaa ""jabhada ciidanka diinta islaamka"" qaban qaabo iyo waxa la galay hub iyo saanad ursi, waxa hubka laga soo ururiyay qoryo waxii la hayay dadka si loogu tabobaro, xaga saanada iyo cuntada oo muhiim aad u ahayd waxa dadka degaanka loo qaybiyay 17 waaxood ama beelood, waxan lagu qori ritay ama qaybsaday saanad ku filaata 1000 qof in la soo ururiyo, degaanka loo qaybiyay in laga soo qaadhaamo raashinka iyo agabta kale waxa uu fidsanaa laga bilaabo Geedbalaadh, Gobyarta, Saxatilay, Qabri-hante iyo inta u dhaxaysa, waxa judhadiiba la yidhi, qayb kasta oo ka mid ah 17-ka beelood ha keenaan, 17 jawaan oo arabikhi ah iyo laba jawaan oo milix ah, oo kayd iyo ku bilowba u noqda jabhada, sida uu ii sheegay Maxamed Aadan Cigaal"" wadaad yare"" waxa gacan xoog leh ka gaystay, suurta galinta hawshaa nin magaciisa la yidhaa, Maxmed Khayre Guuleed. Intaasi waxa dheer muquunada gaar gaarka loo bixinayo oonu dadku waxba xaga danbe ku reebanayn, xanuunka lagu hayo dadka ee kaga imanaya jabhada(jxsg) iyo askarta laajiga degaanka ku ah, ayaa sii dhirigalinayay inay dadka degaanku jabhadooda hagar la" aan ugu quudhaan wax kasta oo looga baahdo, bulshada noocyadeeda kala duwani uma kala hadhin gacan ka gaysiga muquunada la sinayay jabahada, iyada oo dadku ay ficiiltamayeen oo ay taagnayd arintu ama Nafta ama Neefka!!! kuma oolin baaho iyo qaadhaan jaadlayaasha, dukaanlayda, maqaxilayda, beeralayda, baabauurlayda iyo hooyooyinka Caanaha iibiya, oo qaadhaanka ka sokow, aan kaga bakhayli jirin inay markay arkaan wiilashooda ay dhiilaha higaaga ka gooyaan.

Copyright ©2003- Mareegta Raadraac ee Farshaxan. All Rights Reserved.

Hantidaa ka sokow dadku si balaadhan ayay ugu soo biireen jabhadii oo isku soo xereeyeen, tiradaa dhalinyarada ee sii kordhaysa iyo shaki laga qabay maamulkii milatariga ahaa inuu carqaladeeyo yagleelka jabhada ayaa sababay in la raro, oo loo guuro meel kale oo la yidhaa Ina-Dhgo-luqun oo 7-8 kilo mitir gudaha u gashan Itoobiya, oo u dhaxaysa Durya iyo Geed-balaadh, waxana mar labaad laga bedelay jabhadii magacii hore, oo loo bixiyay magac labaad oo cusub oo la yidhaa "" ciidanka Cali-Bayle ee Geed-balaadh". madaxna waxa u ah ilaa hada odayaashii bilaabay, ee Cali Kayd iyo Wadaad-yare. Inta dadka deganku is abaabulayay ee ay jabhada iyo tababarka iyo is ursiga ku jireen, dilka, dhaca iyo waxii kale ee dhib ahaaba way wadeen jabhadihii(jxsg) iyo askartii laajiga ahayd, waxana ay jabhadan(jxsg) xarumo ka dhigatay meelo badan oo degaanka ah, xarunta ugu muhiimsanaydse waxay ahayd tu ku taalay meel la yidhaahdo Gobyaray oo halbawle dhaqaale ahayd, oo 10-15 km Itoobiya gudaha u gashan, oo u dhaxaysa Wajaale iyo Haroorays, oo ay ka samaysteen meel ay lacag baad ah kaga qaadaan dadka siiba jaadlayaasha, xoolaha-damaanka ah iyo safarkaba, halkaasoo oo ay jabhada(jxsg) iyo askartii dawladu ku qaybsan jireen lacagtaa, waxa dhici jirtay mararka qaarkood dagaal ka dhex qarxo iyaga oo ay ku heshiin waayaan lacagtii baada ahayd ee ay dadka ka qadan jireen, dhulku waxa uu iska ahaa fawdo iyo in ninkii qori haystaa ee garabna dawlada ku lehi taliyo, ma jirin wax sharci iyo kala danbayn ahayd, waxa iska cadaa oo la dareemayay in maamulkii ka talin jiray dalkii Somaliya la isku odhan jiray, uu ugu talo-galay in dadka degaanka la dhibo oo ay jabhadan (jxsg) iyo askurtu si aan waabis iyo gabasho lahayn ugu gacan banaanaaneeyeen hagardaamaynta dadka , waayo? dacawd iyo cabasho kasta oo loo gudbiyo dhagaha ayaa ay dadkii maamulka gobolka,degmada iyo hayadaha kaleba ay ka furaysteen wax ka qabashada arintaasi.. Dadkii degaanku waxa uu isku keenay dhalinyaro badan oo lagu ururiyay saldhig ku yaal Ina-dhego-luqun(gudaha Itoobiya), waxase markii la bilaabay tababarkii la arkay in loo baahan yahay gargaar farsamo iyo hubba leh oo badan, arintaasi oo noqotay mid duruufahii jiray xiligaa, aanu dadka degaanku uga maarmayn in dawladii jirtay ee milatariga ahayd la waydiisto inay wax kala qabato, iyada oo lala kaashanayo niman saraakiila oo degaanka u dhashay, iyo niman kale oo iyagana aqoon iyo macruufaba loo lahaa, si loogu fuliyo oo loogu ogolaado jabahadan wadaniga ahi waxay u baahan tahayna waxa lagu doodi jiray inay ka mid noqonayso jabhada xoraynta Somali-galbeed, taasise nasiib daro laguma guulaysan oo waa ay ka dhego adaygtay dawladii Siyaad Bare.

Ha yeeshee halkaa lagagama hadhin ee wax-garadkii iyo odayaashu waxay ciyaareen tab iyo xeelad kale, waxa ay dadkii degaanku arkeen in jabhada xoraynta Somaligalbeed u dhexyaalo, khilaaf wayni oo ku salaysan awood iyo hanti qaybsi, waxa aakhirataankii kala jabay jabhadii JXSG, oo laba u kala go" ay, garab ka mid ah ayaa dadkii degaanku raacay oo uu la saftay, oo weliba magacna loo bixiyay, magaca loo bixiyay waxa uu ahaa"" jabhada xoraynta somaligalbeed sii-galbeed"" halka qaybta kalena ay ku hadhay magacii hore ee ahaa, jabhada xoraynta somaligalbeed.

Copyright ©2003- Mareegta Raadraac ee Farshaxan. All Rights Reserved.

Waxa dabadeedna jabhadii degaanka lagu daray garabkii jabhada xoraynta soomaali galbeed sii-galbeed oo turo ahaan ka yarayd garabka kale ee ay kala baxeen, waxa ay Jabhadii wadaniga ahayd (afraad) halkaa ka heshay oo ay qabyteedii qaadatay hubkii iyo tababarkii la siinayay jabhadaha kaleba dhawr jeer, ku biiristaasi waxay keentay in ay hadana mar sedexaad bedelato jabhadii degaanku magaceedii hore, oo hada loogu wanqalay magacii ay caanka ku noqotay ee Afraad, oo ahaa magac ay ku tiro gashay markii lagu daray jabhadii xoraynta somaligalbeed sii-galbeed, waxa haysan jiray garabkan nin la odhan naanaystiisa "" what do u mean"". Dagaal baa ka dhex qarxay garabkan ay afraad ku birtay iyo kuwii kale, oo waxa la isku qabtay ilahii dhaqaalaha iyo arimo kale, waxana dagaalka ay afraad ka heshay waayo aragnimo badan iyo xirfado ay u baahnayd. Mudo yara dabdeed waxa xidhidhkoodii xumaaday jabhadii afraad iyo qaybtii ama garabkii ay ka tirsanayd ee la odhan jiray jabhada xoraynta somaligalbeed sii-galbeedd, waxa sabab u ahaana waxa uu ahaa.

Dhacii iyo boobkii ay jabhadaha laajiga ahaa ku hayeen degaanka oo ay dhalinyaradii afraad diiday inuu sii socdo, halka kuwa kale ee ku mamayna ay waxba ku qaadan waayeen taasi, waxa taasi ay keentay in fooda la is daro, gabagabadiina waxay marxaladaa cusubi ku khasabtay Afraad inay gooni u baxdo, waxa ay isticaamli jireen eray la yidhaa"" shoobaro"" oo ay afraad shoobarayso!!, laga bilaabo maalintaa afraad Gooni bay isku taagtay, siday ii sheegeen Maxamed Aadan Cigaal "" wadaadyare"" iyo Cali Cabdi Xasan"" Cali kayd"" mudada ay waxaasi dhacayaan waa intii u dhaxaysay 1978-1979-kii, xiligan Hogaaminta jabhada afraad markay gooni u baxday waxa maamulayay labadan nin ee Cali kayd iyo Wadaadyare iyo qaar ka mid ah dhalinyarada jabhada ah laftaarkooda. Afraad: Maxamed-cali, cabdi kariim iyo dhuxul iyo halgankoodii (1979-1982) - Hadaba in yaruun ka dib markay isku dhaceen Afraad iyo garabkii ay ka baxday ee sii-galbeed(jxsg), waxa isna ka soo goostay Jabhada Xoraynta somali-galbeed oo uu ka tirsanaa lana galay dagaalkii Itoobiya ee 1977-78, mujaaahid Maxamed Cali(maxamed-cali), oo ay isa soo diideen nimankii Taliska jabhada xoraynta Somaligalbeed haysan jiray, mujaahid Maxamed Cali waxa uu ku jiray gaaska Axmed Guray, Guutada 5-aad.

Waxa uu ku soo biiray Maxamed Cali jabhadii Afraad, oo looga dhigay hogaamiyaha ama taliyaha Ciidanka Afraad, halka ay hawlaha kalena ay wadeen odayaasha degaanka guud ahaan gaara ahaana, labada nin ee dusha ku qoran (cali kayd iyo wadaad yare) iyo kolba cidii kale ee u gacan banaan. Markaasaa ay afraad bilowday inay goonideeda u raadsato, sad waxay ku lahayd cashuurta(baadii) ay qaadan jireen, jabhada xoraynta Somaligalbeed oo dhami, iyo weliba afraad oo olole ku qaaday askartii iyo jabhadihii ka ugaadhsan jiray degaanka ee dilka, dhaca, iyo boobka dadka ku hayay, ma yarayn dhibka ay la kulmi jirtay Afraad ee ay ku hayeen jabhadihii iyo askartiiba,waxase caawinayay degaankeedii ayay ku dagaalamaysay. Markii dagaalkii afraad joogto noqday waxa ku soo biiray niman u dhashay degaanka oo milatari ama askar kaleba ahaan jiray oo soo xoojiyay afraad, waxa kale oo magaceedii gaadhay dad iyo degaano kale oo badan oo ku diirsaday, waxa ninkasta oo ku noolaa xiliyadaa degaankaa ama inuun ka war hayay, qirayaa inay ahayd dhul qawlaysato gasho oo lama galaana, ha yeeshee ninkii ilaahay ku beeray een meel kale haysanin waa ku qasban yahay, inuu dhibtan bani-aadanku

Copyright ©2003- Mareegta Raadraac ee Farshaxan. All Rights Reserved.

sameeyay uu xal u helo, miciin baana ay ahayd Afraad lagu diirsaday, Mujaahid Maxamed Cali lama qiyaasi karo isaga iyo inta kale madaxda ahayd ee la waday hawshu inta jeer ee ay dabin ka badbaadeen lagu dilayo, ama lagu xidhayo, markuu mudo hogaanka jabhada hayay ee uu dagaal kulul kula jiray jabhadihii qalaad, mujaahid Maxamed Cali waxa uu jabhada Afraad soo hogaaminayay,1979-1980-kaa horaantiisii, ka dibna waa uu ka tagay, sababta mid shakhsi ah uun bay ahayd, waase uu jiray xidhiidh hoose oo u dhaxeeyaa isaga iyo jabhada iyo dad kale oo badanba, waxa bedelkiisii noqday Mujaaahid Cabdi-kariim Cali Buux. Mujaahid Cabdi-kariim, waxa uu ka tirsanaa milatarigii dadlkii Somaliya la odhan jiray, waxan uu ka mid ahaa ragii gurmadka ugu yimid Afraad ee soo xoojiyay, waxa uu mujaahidku halkii ka sii anba qaaday dagaalkii iyo jihaadkii xaqa ahaa ee jabhada Afraad ee mitidka ahayd kula jirtay jabhadihii doolaallada ahaa ee budhcada ahaa,si hadaba loo baabiiyo afraad, waxa iskaashi sameeyay jabhadihii, askartii iyo maamuladii degaanka, heer degmo ilaa gobol, waxa la sameeyay, dagaalo wada jir ah oo lagu qaado, dabino loo qoolo oo lagu qaqabanayo madaxdooda, cuna qabatayn lagu soo rogay, oo loo diiday inay qaataan qaybtii ay ku lahaayeen cashuurtii ay jabhaduhu ka qaadan jireen, jaadlayaasha iwm, kumase ay wiiqmin Afraad waxaasoo dhan, markii danbe waxa loo maleegay dabin kale oo la doonayo, in lagu baabiiyo, waxa la yidhi waxa Tabobaro loo furayaa Jabhadaha, oo Afraadna lagu soo daray, dadka maamulkii Siyaad Bare ee ay is hayeen Afraad bilow ilaa dhamaad (1978-1982), ee madaxda ka ahaa gobolka iyo degmada waxa ka mid ahaa, Siciid Faarax(salxaan) iyo Maxamed Xaashi (gaani) oo isaga danbeeyay Taliska qaybtii 26-aad ee gobolada waqooyi, degmada Gabiiley waxa haystay Buule, guutada milatariga ee deganayd Gabiiley waxa haystay nin la odhan jiray Afrikaan, waxan uga danbeeyay Maxamed Yuusuf, degaamada xadka ciidamada yaala ee ay maryaha dhiiga leh kala furteen Afraad, waxa ka mid ahaa saraakiishii haysan jirtay, niman ay ka mid yihiin nin la odhan jirayta Musbaar iyo Dhoore. Nabad sugida (nss) waxa gobolka haystay Maxamed Cali baranbaro, NSS-ta degmadana waxa haystay Yuusuf jafaal. Waxa la geeyay jabhadii Afraad, xero milatariga lagu tababari jiray oo ku taal magaalo gubanka ku taal, oo magaceeda la yidhaa Burdi taariikhdu markay ahayd 07/07/1980, hubkii ayaa laga guray, dabadedna waxa laga soocay madaxdii oo Hargeysa loo qaaday oo lagu xidhay, waxa ka mid ahaa dadkaa la xidhay, mujaahid Cabdi Kariim oo ahaa hogaamiyahii Afraad, falkaa Afraad waxay ka samaysay fal-celis oo waxay xoog ku qabsadeen oo ay ku jabsadeen bakhaar hubku u yaalay askartii milatariga ahayd, dagaal baana halkii ka qarxay waxana sida uu ii sheegay, Maxamed Aadan Cigaal wadaad yare. halkaa askartii lagaga dilay askar tiradoodu ay gaadhayso 22 askari, kadibna jabhadii afraad ooday iska gurtay oo dib bay ugu soo noqotay xarumaheedii ku yaalay degaamada Geedbalaadh iyo agagaarkeeda, isla wax yar ka dib xadhigii mujaaahid Cabdi-kariim, waxa la doonay mujaahid Axmed Faarax Colow oo ku magac dheeraa ""Dhuxul"" oo bedelay cabdi Kariim. Mujaahid Axmed Faarax Colow(dhuxul) waxa uu ahaa nin dagaalka xeel dheere ku ah, laguna yaqaanay tab iyo xeelado dagaal badan, oo sida labada halyay ee kale ee Maxamed Cali, iyo Cabdi kariim ayaa uu isna ahaa soo ma jeeste yaqaan sida rag iskaga celiyoi, waxa intaa u dheerayd lehaansho tayo uu ku wadi karo ciidan kala duwan iyo xaaladahii adkaa ee ay la kulmayeen goor kasta, waxa uu isna halkii ka sii waday dagaalkii oo jabhadihii iyo askartii la sococtayba waxa ay ku kiciyeen guluf iyo colaad hor leh oo hadh iyo habeenba leh, dhanka kale waxa ay dawladii Siyaad Bare bilowday inay odayaashii iyo wax garadkii cadaadis saarto oo ay isku daydo inay

Copyright ©2003- Mareegta Raadraac ee Farshaxan. All Rights Reserved.

mar labaad iyo sedexaadba ku khasbaan inay jabhada Afraad, soo galiyaan xeryaha lagu tababaro, ha yeeshee Afraad oo og jabka lala maagan yahay dhegay jalaq umay siin, waxana ay u talaabeen oo ay ku noqdeen xeryahoodii xadka ka talawsanaa ee xaga Itoobiya ku yaalay, siiba Ina-dhego-luqun iyo mid Cusub oo ay Siyaarada Cali-bayle ka samaysteen, iyaga oo u xushay xeryahan arimo nabad galyo iyo in ay ka badbaadaan faro-galin badan oo kaga imanaysay maamulkii milatariga ahaa, meelaha cusub ee loo qorsheeyay in la geeyo oo lagu baabiiyo waxa ka mid ahaa xeryaha milatariga ee ku kala yaala Ceel Giniiseed, Cadaadlay, Qoolcaday iyo Burdi oo ay iyada sooba mareen. Dhanka kale waxa aan is-dhiman dagaalkii maalinlaha ahaa ee ay kula jirtaay Afraad jabhadihii qalaad iyo askartii, ku mamay xoolaha dadka degaanka, waxase uu dagaalkii ugu kululaa ee lagu kalaa khaatumaystaa ku dhex maray jabhadahii iyo askartii is watay oo dhan ah iyo Afraad oo kali ah horaantii 1981, waxan uu ka dhacay dhawr aag oo kala duwan, waxana uu socday 11 cisho oo xidhiidha, waxa dawladii siyaad bare ay ergo waan-waan iyo nabadayn doon ah u soo dirt dadkii inuun wax ahaa ee degaanka gabiiley, haday tahay culmadii oo ay hogaaminayeen, labadii sheekh ee ugu waawaynaa degaanka waa sheekh Muxumad Warsame(sh, muxumad yare) iyo sheekh Muxumad Gaboobe, suldaamadii iyo cuqaashii oo ay hogaaminayaan, suldaan Cabdi, iyo Maxamed Ibraahim Khaliif iyo Xaruur, iyo dad aad u tiro badan oo Wajaale yimid , markay ka war heshay Afraad arintaa dagaal baya kala hortagtay, waxana y Baasuukayaal ku riday goobtii ay odayaashu fadhiyeen, si ay u cabsi galiyaan, codsigii iyo fariintii ay sideen guurtidaa balaadhanina waa ay ka diiday Afraad, aakhirkii markay dhimasho badan iyo dhaawacba yimaadeen, waxa iskaga huleelay degaankii jabhadihii doolaalada ku ahaa, waxana dhulkii uu noqday Gole-banaan, iyo dheg dheer dhimatoo dhulkii waa nabadeey!!!.Dawladii Siyaad Bare sidaa kagama hadhin Afraad weli, oo waxa bilaabmay Xiligii SNM iyo hawl kale oo cusub. Afraad iyo aasaaskii SNM.

Markii lagu dhawaaqay ururkii dhaqdhaqaaqa wadaniga Soomaaliyeed (SNM) waxa uu dardar hor leh galiyay Taliskii milatariga ahaa ee Somaliya ka arimin jiray, sidii uu usoo xerogalin lahaa jabhada Afraad, waxa uu taliskii u soo xil saaray oo uu u magacaabay odayaal gaara inay arinta Afraad soo dhameeyaan, iyada oo lagu sabayao in loo fulinayo waxyaabo badan sida tababaro loo furayo, hub iyo saanad la siinayo iwm,
Aakhirkii markay diiday Afraad in ay dib ugu laabato tabobar, waxa gaalaa baxay magaalada geedbalaadh, ergooyin badan oo ay dawladii milatariga ahayd soo dirtay, waxay ka kala yimaadeen ergooyinkaasi, degmada Gabiiley, Gobolka Hargeysa, iyo weliba Muqdisho, ergooyinkaa waxa ugu cuslaa wafdi uu Hogaaminayay marxum, madaxweyne ku xigeen, Axmed Maxamuud Faarax ""ina lax-was"" oo Geedbalaadh maqaamka sh, Isaxaaq odayaasha iyo taliyayaashii jabhada kula shiray, hayeeshee is bedel kuma dhacin maqifkii jabhada.

Afraad meelahan ay deganayd ee Itoobiya gudaheeda ah waxa uu ahaa dhul aan cidina xukumin xiligan, waayo? markii dagaalka lagu soo jabiyay dawladii Somaliya, ciidankii Itoobiyaanku kuma ay soo noqon xadka iyo halkii ay berigii hore deganaan jireen, ee meel ka durugsan xadka bay xeryo ka samaysteen, taasina waxa ay suurta galisay in jabhadahii ay dhul banaan ka ugaadhsadaan, Afraad labada daaamoodba saldhigyo ayaa

Copyright ©2003- Mareegta Raadraac ee Farshaxan. All Rights Reserved.

ay ku lahayd, inkastoo markii danbe ay ku nagaatay oo badsatay deganaaanshaha dhanka Itoobiya.

Markii SNM ay bilowday inay soo galaan Itoobiya, waxa uu ii sheegay Maxamed Aadan Cigaal"" wadaad yare"" in ay saraakiil badani ugu yimaadeen Afraad xeryaheedii Itoobiya, waxa ka mid ahaa saraakiishaa u timid muj, Maxamed Kaahin, oo sida uu ii sheegay jabhadii Afraad ugu yimid xaruntoodii Siyaarada oo 8-9 kilo mitir, ka xigta galbeed magaalada Geedbalaadh, gudahana u gashan Itoobiya, halkaasoo uu la joogay 7 cisho, markii ay sharciyowday SNM ee la soo ogolaaday ayaa Afraad uu wato Dhuxul iyo saraakiishii u horaysay ay isku xidhmeen, halkaasaana ay ka bilaabeen, halganakii dheeraa ee lala galay dawladii milatariga ahayd, Afraad oo mudo ku dhaw 4-sano kali soo dagaalamaysay waxay u noqotay halgankii SNM halbawle ay ku badbaado oo ku unkanto oo ay ku taabogasho.

Afraad waayo-aragnimo iyo xeeladohii ay soo kasbatay waxa ka faaiidaystay SNM oo ay ku biirisay, waxan ay afraad iyo dadkii kale ee SNM ku soo biirayba ay si geesinimo leh u guteen waajibkii saarnaa, qaybaha kale ee halganka SNM iyo kaalintii ay afraad ka qaadatay waa wax dadkii iiga xog-ogaalsanaa ee ay halgankaa wadaageen ogyihiin, aniguna iyagaan taa u daynayaa, oo xadka ka talaabi maayo.

Afraad markii ay ku biirtay SNM ee uu xaqiiqsaday maamulkii milatariga ahaa arintaa, waxa uu kula kacay dadkii degaanka deg, Gabiiley cadaadis, dil iyo dhacba lahaa, waxana sida la wada ogaa degaanka Gabiiley uu ka dhigay maamulkii milatariga ahaa intaanu dagaalkii waynaa ee SNM gudaha ku soo gashay 1988-kii dhicin xero dhiig iyo meesha u dadka ku qasho, waxa dadka la saaray Bandoo lagu naafaynaya dhaqaalahooda iyo noloshooda, isku ssoo wada duuboo, ninkii xaq ku dagaalamayay ayaa guulaystay.

Taariikhdii Afraad intaasaan ku soo koobayaa, hadii qaladaad igu yimaado, waan iga ilduuf ee raali hala ahaado.

Wa bilaahi tawfiiq.

Cali Cumar Xasan.

Copyright ©2003- Mareegta Raadraac ee Farshaxan. All Rights Reserved.